



Sidee Lagu helaa Dhibcaha

Miiska ku jira

Waxa aad xaq ugu yeelaneysaa macaashka Lambarka Bulshada adiga oo dhibco ku helaya marka aad shaqeyso oo aad bixiso canshuurta Lambarka Bulshada.	1
Sharciyo u gaar shaqooyinka qaarkood	1
Intee in le'eg ayaa lagaa doonayaa in aad shaqeyso si aad xaq ugu yeelato Lambarka Bulshada	2
Macaashka dhaxalka	2
Shaqo kasta lama xisaabo si aad u hesho macaashka Lambarka Bulshada	3
Hubi in diiwaanka lagaa hayo yahay mid sax ah.	3
La Xiriirka Lambarka Bulshada	4

Waxa aad xaq ugu yeelaneysaa macaashka Lambarka Bulshada adiga oo dhibco ku helaya marka aad shaqeyso oo aad bixiso canshuurta Lambarka Bulshada.

Dhibcaha Lambarka Bulshada waxa ay ku saleysan tahay lacagta aad shaqeysay Shaqada aad ka soo shaqeysay ayan go'aan kaga gaarnaa haddii aad xaq u leedahay macashka hawlgabka ama naafada ama macaashka dhaxalka ee marka aad geeriyooto.

Sanadka 2018 halkii dhibic waxa ay u dhigantaa \$1,320 oo dakhli ku soo gala ah — ugu badnaan afar dhibcood sanadkii.

Dakhliga aad dhibcaha ku heli karto waa mid kor u kacaya sanadba sanadka ka dambeeya ee sii kordhaba celceliska dakhliga dadka soo gala. Dhibcaha aad hesho waxaa lagu qoraa diiwaanka Lambarkaaga Bulshada xitaa haddii aad bedesho shaqada ama aadan shaqeyn in muddo ah.

Sharciyo u gaar shaqooyinka qaarkood

Sharciyo gaar ah ayaa lo adeegsadaa Lambarka Bulshada nooc ka mid ah shaqooyinka qaarkood.

Haddii aad iskaa u shaqeyso, waxa aad dhibcaha Lambarka Bulshada laguugu sixaabayaa sida qofka shaqeeya oo kale (halkii dhibic waxa ay u dhigantaa \$1,320 oo dakhli ku soo gala ah, laakiin ugu badnaan afar dhibcood sanadkii. Sharciyo gaar ah ayaa lagu eegayaa

haddii dakhliga snadka oo dhan ku soo gala ka yar yahay \$400.00 Macluumaad dheeraad ah waxa aad ka heleysaa *If You Are Self-Employed* (Publication No. 05-10022).

Haddii aad ka tirsan tahay ciidamada, waxa dhibcaha Lambarka Bulshada laguugu xisaabayaa sida dadka madaniga ah loogu xisabo. Waxaana suurogal ah in lagu xisabo dakhli dheeraad ah xaaladaha qaarkood. Macluumaad dheeraad ah, ka akhri *Military Service and Social Security* (Publication No. 05-10017).

Waxaanu adeegsanaa sharciyo gaar ah oo ku saabsan sida aad dhibco ugu heleyso shaqooyin kale qaarkood. Shaqooyinkaas waxaa ka mid ah—

- Adeegayaasha Guryaha;
- Beeraha;
- Kaniisadda ama hay'ad ay kaniisaddu maamusho oo aan laga qaadin canshuurta Lambarka Bulshada.

Nala soo xiriir haddii aad wax su'aal ah ka qabto sida dakhliga ku soo gala dhibco laguugu xisaabay.

Intee in le'eg ayaa lagaa doonayaa in aad shaqeyso si aad xaq ugu yeelato Lambarka Bulshada

Dhibcaha lagaa doonayo si aad xaq ugu yeelato macaashka waxa ay ku xiran tahay da'daada iyo nooca macaashka.

Macaashka hawlgabka

Qof kasta oo dhashay 1929kii ama ka dib, waxa uu u baahan yahay 10 sano oo shaqo ah (40 dhibcood) si uu xaq ugu yeesho macaashka hawlgabka. Dadka dhashay wixii ka horeeyey 1929kii sanado ka yar ayey u baahan yihiin.

Macaashka naafada

Inta sano ee lagaa doonayo in aad aad shaqeyso si aad u qaadata macaashka naafada waxa ay ku xiran tahay inta ay da'daadu tahay marka naafada noqoto.

- Haddii aad naafada noqoto inta ka horeyso 24 jir, waxa aad u baahan tahay sanad iyo bar shaqo ah (lix dhibcood) sadexda sano ee ka horeysay inta aadan naafada noqon.
- Haddii ay da'daadu tahay 24 ilaa 30, waxa aad inta badan u baahan tahay kala bar dhibcaha mudada ay da'daadu u dhaxeeyso 21 iyo waqtiga aad naafada noqoto.
- Haddii aad naafada noqoto da'da 31 ama ka weyn, waxa aad inta badan u baahan tahay ugu yaraan 20 dhibcood tobanka sano ee ku xiga ka hor inta aadan naafada noqon. Jaantuska hoose waxa uu muujinayaa tusaale dhibcaha aad u baahan tahay haddii aad naafada noqoto da'a kala duwan oo la soo doortay. Jadwalkan kama hadlayo xaaladaha oo dhan.

Da'da aad naafada ku noqoto	Dhibcaha aad u baahan tahay	Sanada shaqada
31 ilaa 42	20	5
44	22	5 ½
46	24	6
48	26	6 ½
50	28	7
52	30	7 ½
54	32	8
56	34	8 ½
58	36	9
60	38	9 ½
62 ama ka weyn	40	10

Macaashka dhaxalka

Marka uu shaqeynayey oo uu laga qaadayey canshuurta Lambarka Bulshada uu geeriyoodo, xubnaha ka tirsan qoyska ayaa laga yaabaa inay xaq u yeeshaan macaashka dhaxalka. Ilaa 10 sano oo shaqo ah ayaa loo baahan yahay si xaq loogu yeesho naafada, taasoo kuxiran da'da qofka xilliga dhimashada. Dadka leh dhaxalka ee shaqaalaha da'da yar ee shaqeyya

oo laga yaabo inuu xaq u yeesho haddii qofku uu shaqeynayey 1½ ee sadexda sano ee ka horeysay dhimashadiisa.

Macaashka dhaxalka ee Lambarka Bulshada waxaa la siiyaa:

- Xaaska ama sayga laga geeriyoodo — macaasha buuxa da'da hawlgabka, ama macaash la yareeyey dadka codsada da'da 60 jir.
- Xaaska ama sayga laga dhintay ee naafada ah — horey us codsada da'da 50 jir.
- Xaaska ama sayga korinaya ilmaha qofka geeriyooday oo da'diisu ka yar tahay 16 ama naafo ah, oo qaadanaya macaashka Lambarka Bulshada.
- Xaaska ama sayga kala tagay xaaladaha qaarkood.
- Caruurta aad dhashay oo aan weli guursan oo ka yar 18 sano ama ilaa 19 haddii ay dhiganayaan dhiganayaan xilli buuxa ee dugsigiga dhexe ama dugsigiga sare. xaalado gaar ah qaarkood, macaashka waxaa la siinayaa ilmaha xaaskaagu dhashay, aad awoowaha u tahay, ilmaha xaasku dhashay ay dhaleen, ama ilmo aad korsatay.
- Caruurta naafada noqday inta aanay da'doodu gaarin 22 oo weli naafo ah.
- Waalidiinta qofka geeriyooday oo 62 ama ka weyn.

Nala soo xiriir haddii aad dooneyso macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xaaladda qoyskaaga.

Medicare

Dhibcaha Lambarka Bulshada ee aad hesho waxa ay kaa dhigi karaan in aad xaqu yeelato ceymiska caafimaadka ee Medicare marka aad gaarto 65. Waxaa suurogal in aad xaq u yeelato Medicare xilli hore haddii aad qaadanaysay macaashka naafada 24 bilood ama ka badan. Dadka aanay kelyahoodu shqeyneyn ama ku qaata macashka iyaga oo qaba cudurka murqaha (cudurka Lou Gehrig) ma sugayaan 24 si loo siiyo ceymiska caafimaadka ee Medicare.

dadka kula nool ama leh dhaxalka waxa ay sidoo kale xaq u yeelan karaan Medicare da'da 65 ama ka hor haddii ay naafo yihiin. Dadka kelyaha ka jiran ee u baahan in kelyaha laga dhaqo si joogta ah ama laga bedelo waxa ay xaq u yeelanayaan Medicare da'a kasta taasoo kus aleysan dakhliga soo gala xaaska/sayga ama waalidka iyo sidoo kale dakhliga u gaarka ah Haddii aad dooneyso macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Medicare nala soo xiriir ama weydiiso *Medicare* (Publication No. 05-10043).

Shaqo kasta lama xisaabo si aad u hesho macaashka Lambarka Bulshada

Lambarka Bulshada ma siiyo macaash dhamaan shaqaaalaha oo dhan. Shaqaaalahaas waxaa ka mid ah:

- Shaqaaalaha dawladda dhexe ee shaqada la qoray wixii ka horeeyey 1984kii (tan iyo 1dii Janaayo 1993 dhamaan shaqaaalaha dawladda dhexe waxaa caafimaaddkooda bixinayey ceymiska Medicare taasoo qeyb ka ah canshuurta Lambarka Bulshada);
- Shaqaaalaha tareenada ee shaqada ku jiray wax ka badan 10 sano;
- Shaqaaalaha gobolada qaarkood iyo dawladdaha hoose oo doorta in aanay ka qeyb qaadan Lambarka Bulshada; ama
- Caruurta da'doodu ka yar tahay 21 ee waalidkood guryaha uga shaqeeya (marka laga reebo ilmaha da'doodu tahay 18 ama ka weyn ee ka shaqeeya ganacsiga waaalidkood).

Hubi in diiwaanka lagaa hayo yahay mid sax ah.

Goobaha shaqada oo dhan waxa nuqul ka mid ah foomka W-2 (Wage and Tax Statement) xafiiska Lambarka Bulshada. Lambarka Bulshada waxa isla barbardhigayaa magacaaga iyo Lambarka Bulshada ee ku qoran foomka W-2 iyo macluumaadka diiwaanka noogu qoran. Marka uu na soo gaaro magacaaga iyo lambarkaaga, dakhligaaga ku qoran foomak W-2

waxaa lagu qoraa diiwaanka guud ee lagu qoro dakhliga ku soo gala noloshaada. Diiwaanka dakhliga ku soo gala noloshaada waxaa loo adeegsadaa in lagu xisaabo in aad macaash xaq u leedahay iyo inta lagu siinayo.

Waa muhim in magacaaga iyo Lambarka Bulshada ee ku qoran kaarka lagu siiyey ay la mid yihiin mid waafaqsan macluumaadka goobta shaqada iyo foomka W-2. Waa in aad hubisaa in labada diiwaan is waafaqsan yihiin si aad u sugto macaashka aad heleyso. la socodsii goobta shaqada haddii magacaaga iyo Lambarka Bulshada aanay si sax ah ugu qorneyn diiwaanka goobta shaqada. Haddii Lambarka Bulshada uusan sax aheyn, la xiriir xafiiska Lambarka Bulshada.

La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiri kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda www.socialsecurity.gov. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my Social Security* xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement (Warbixinta Lambarka Bulshada)*, ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;

- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada lagu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.



Securing today
and tomorrow

Social Security Administration
Publication No. 05-10072-SO | January 2018
Sidee Lagu helaa Dhibcaha
How You Earn Credits 2018 (Somali)

Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha